

Barnaamijkka WIC ee Minnesota: Waajibaadkaaga iyo Xaquuqdaada

5 / 2023

Waxa aad kafilan karto WIC

Waxbarashada Nafaqada. WIC waxay kusiinaysaa tilmaamo iyo talo si lagaaga caawiyo inaad qoyskaaga siiso cunto caafimaad qabta.

Macluumaadka. Wuxaan kaacaawinaynaa inaad hesho daryeel caafimaad, talaalo iyo barnaamijyo kale.

Cuntooyinka WIC. Wuxaan kusiinaynaa kaarka WIC si aad ugu iibsato cuntooyin caafimaad qaba.

Sinaanta Ladhaqanka. WIC iyo shaqaalaha dukaankuba waxay kuula dhaqmayaan si lamid ah dadka kale ayadoon laga fiirinayn isirkaaga, midabkaaga, da'dada, wadankaad kasoo jeedo, naafonimadaada, ama jinsigaaga. Hadaad isleedahay waa lagu takooray, waxaad cabasho ugudbin kartaa USDA (gadaal kafiiri).

Helitaanka. Noosheeg hadaad ubaahantahay turjumaan - adeegyada turjumaanka oo lacag la'aan ah ayaa laheli karaa. Hadaad tahay qof naafo ah, adeegyo gaar ah ayaa lagu siinaya.

Cadaalada. Wuxaad codsan kartaa dhagaysi dacwadeed hadaadan kuqancin go'aanka shaqaalaha WIC ee ku aadan xaqa aad uleedahay adeegyada WIC.

Isticmaalka macluumaadka. Macluumaadka aad siiso WIC waa mid adigga kuugaar ah. Waxaa oo adeegsanayaa in lagu go'aansho hadii adigga ama cunugaagu aad xaq uleedihin adeegyada WIC iyo sida ugu fiican ee laydinku adeegi karo. Ayadoon lahelin macluumaadka buuxa, waxaa suuragal ah inaanaan awoodin xaqijiinta adeegaaga WIC. Macluumaadka waxaa kaliya lalawadaagi karaa dadka xariirkha tooska ah la leh maamulka WIC, ilaa inaad ogolaansho saxiixdo mooyaane. Waxaa sidoo kale loo adeegsan karaa warbixinada iyo xisaabaadka, laakiin magacaga lama adeegsan karo.

U giirista wadan kale? Faa'dooyinkaaga WIC halkaas ayuu ka soconayaa. Noo sheeg ka hor inta aadan aadin iyo waxaan ku siineynaa ogeysiinta wareejinta oo aad hore u qaadid.

Waxa WIC ay kaafilanayso

Ilaali xiliyada balanta. Fadlan wac xaruntaada caafimaad ee WIC hadaad rabto in balanta markale laguu qabto.

Xeerka guud. Waa inaad kuladhaqantaa WIC iyo shaqaalaha dukaanka xushmad iyo karaamo.

Si sax ah u isticmaal kaarkaaga WIC. Tani waxay kadhigantahay:

- Kujoogso dukaanada WIC kashaqeeyo.
- Kaliya ku iibso cuntooyin haraadiga gunooyinkaaga inta lagu jiro waqtiga la cayimay.
- Gunooyinka cuntada ee waqtigoodu dhacay ama lafuray lama badeli karo.
- Ha iibin, ama iib ha ubandhigin, ganacsi, ama hasiin cidkale kaarkaaga WIC, cuntooyinkaaga, bamka naasaha ama cuntooyinka caruurta.
- Hakubadalan ama hadhaafsan cuntooyinka WIC iyo nafaqada ilmaha lacag, dayn, ama waxyaabo ay iskuqiimo yihiin cuntada.
- Usheeg WIC hadii kaarkaagu dhumay, laxaday, ama jabo.
- Xafido kaarkaaga WIC iyo BINkiisa. Kaliya lawadaag BINkaaga kaliya dadka fsaxa uhaysta inay kaarkaaga adeegsadaan.
- Kaqaado kaarka WIC kaliya hal xarun caafimaad oo WIC hoos tagya xiligaad doonto.
- Usharax shuruucda iyo sida loo isticmaalo Kaarka WIC dadka kula isticmaalaaya.

Runta. Hadaad wax qariso ama macluumaad been ah sheegto si aad uqaadato gunooyinka WIC, waxaa suutagal ah in barnaamijka lagaa saaro, aadna dib ubixiso lacagtii laguu siiyay cuntada aadan xaqa ulahayn inaad qaadato, ama waxaad waajihu kartaa talaabooyin sharci.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharchiyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salsyan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), naafonimada, da'da, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay kala xidhiidhaan Hay'adda Gobalka ama deegaanka ee mas'uulka ka ah maamulka barnaamijka ama xarunta TARGET ee USDA lambarka (202) 720- 2600 (cod iyo TTY) ama waa inay la xidhiidhaan USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta:

<https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay , iyada oo la wacayo (866) 632-9992, ama la qorayo warqadku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwadqabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in loogu diraa USDA;

1. boostada:

U.S. Department of Agriculture
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights
1400 Independence Avenue, SW
Washington, D.C. 20250-9410; ama

2. fakiska:

(833) 256-1665 ama (202) 690-7442; ama

3. iimaylka:

program.intake@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.